

Hordhac

Maxaa dhaca ka dib marka aad qashinkaaga ku ridid weel qashin ama haan qashin? Waxa qaada baabur qashin kaasoo geeya goob dib-uga-faa'ideysi qashin (resource recovery facility) ama dhul qashin buuxis (landfill).



Goob dib-uga-faa'ideysi qashin waa goob lagu gubo qashin si looga sameeyo koronto iyada oo lagu dhaqmayo xaalado la xukumo si loo badbaadiyo hawada.



Dhul qashin buuxis waa god dhulka ku yaala oo la dhigay tuubooyin oo loogu talagalay in lagu ururiyo dheecaanada si loo badbaadiyo biyaheena. Dhulka qashin buuxiska ah qaar ku yaala Minnesota ayaa aasa qashinka ka dibna ururiya neefta metayn (methane gas), ka dibna isticmaala neefta si loo dhaliyo koronto. Korontada oo la dhaliyo waa hab fiican oo looga faa'iideysan karo qashinka marka aan dib loo isticmaali karin, aan dib loo dhaqangalin karin (recycle) ama aan la digeyn karin ama bacrimiye laga dhigi karin.




Waa khasaare in la gubo ama la aaso alaab dib loo isticmaali karo. Marka aanaynu taxadir yeelan, waxa aynu tuurnaa alaab dib loo isticmaali karo ama dib loo dhaqangalin karo. Haddii aynu fiirino qashinka uu baabuurka qashinku qaado, waxa aynu arki karnaa waxyaabo badan oo dib loo isticmaali karo ama loo dhaqangalin karo.



Waxa aynu dib u dhaqangalinaa waraaqo badan, laakiin waxaynu wali tuurnaa waraaqo kale oo badan. Waxa aynu dib u dhaqangalinaa dhalooyin badan oo balaastig ah, laakiin waxa aynu wali tuurnaa qaar badan. Dawladda Gobolka ayaa ku dhaqaaqday kala-saarid qashin waxana la ogaaday in 40% waxa aynu tuurno dib loo dhaqangalin karo.



Lacag badan ayaa ku baxda in qashinka la qaado oo meel la geeyo, isla markaana marka aynu tuurno alaab qiime leh waxa aynu khasaareynaynaa lacag iyo alaab dabiici ah. Waxa todobaad kasta lacag dheeraad aynu ku bixinaa tuurista weel qashin oo weyn taasoo yaraan lahayd haddii aynu yareyno qadarka qashinka ah oo aynu isticmaalno weel kaa ka sii yar.



Doorashada ugu fiicani waa adiga oo isku daya in aad noqoto “qashin eber” ama qof qashinkiisu eber yahay, si aan loogu baahan in qashin la fogeeyo. Laylisyadan soo socda waxa aad ku baran doontaa waxa aad sameyn kartid si aad u yareysid qashinka, waxa aad dib u isticmaali kartid iyo waxa aad dib u dhaqangalin kartid.



Fadlan naga gargaara in la yareeyo qadarka qashinka ah ee aynu tuurno. Waa muhiim in hawada iyo biyaha Minnesota laga dhigo kuwo nadiif ah intii suurogal ah iyo in aynu khayraadkeena dabiiciga ah u madhxino caruurteena iyo caruurta ay sii dhali doonaan.

